

Janaayo 15, 2021

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Waxaan ku faraxsanahay in aan idinla wadaagno in Oregon ay mar kale sameyn doonto ra'yi ururinta wax ku qanacsanaanta si loo ogaado sida wanaagsan ee aanu u buuxinayno baahiyaha dadka aanu u adeegno. Ra'yi ururintani waxay naga caawisaa in aan isbarbardhig ku sameyno horumarkayaga muddo marka la joogo oo aan barnaamijyadeena barbardhigno gobolada kale. Wareega koowaad ee ra'yi ururintu waxay bilaabmaysaa bishan.

Waan fahamsanahay in dhamaan waxyaabaha ka dhacaya dunida, iyo noloshadaada, ay ra'yi ururintu dhici karto in aysan u muuqan mid muhiim ah. Fadlan ogow in su'aalaha la xiriira ra'yi ururintu ay muhiim noogu yihiin fahamka iyo halka aan uga baahanahay in aan wax wanaajino si aanu si fiican ugu taageerno dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo qoysaskooda.

Waxaanu markale iskaashi la yeelanaynaa mashruuca Muujiyayaasha Xudunta u ah Qaranka (NCI). NCI waa dadaal wada shaqayneed oo ka dhexeeya Ururada Qaranka ee Agaasimayaasha Gobolka ee Adeegyada Naafanimada Koriinka iyo Machadka Cilmi-baarista Adeegyada Dadweynaha. Afartan iyo lix gobol iyo District of Columbia ayaa ka qayb qaata mashruuca, oo na siinaya xog isbarbardhig oo wanaagsan.

Mashruuca NCI ayaa dejiyay muujiyayaasha xudunta u ah qaranka si loo fiiriyo natiijooyinka loogu talagalay dadka iyo qoysaska helaya adeegyada. Muujiyayaashu waxay muhiimada siiyaan, shaqada, xuquuqaha, qorsheynta adeega, ka mid noqoshada bulshada, kala doorashada iyo caafimaadka iyo badbaadada. Sanadkani, su'aalaha waxaa lagu soo dari doonaa waxyaabo ku saabsan cudurka baahsan ee COVID-19 si loo qiimeeyo sida uu cudurka baahsani u saameeyay nolosha dadka helaya adeegyada I/DD iyo hay'adaha bixinaya adeegyadaasi.

Oregon waxay ka qayb qaadanaysaa saddex ra'yi ururin 2021. Waxaanu kaa codsanaynaa in aad gacan ka geysato xaqijinta guusha ra'yi ururinta adiga oo ka qayb qaadanaya marka la codsado.

Farriintani waa in ay ka hadashaa ra'yi ururinta u horreysa barnaamijka (Adult in-Person). Farriimaha mustaqbalku waxay ka hadli Doonaan Ra'yi Ururinta Ilmaha Qoyska iyo Ra'yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha.

Ra'yi ururinta barnaamijka Adult in-Person: Kani sida caadiga waa wada hal fool ka fool ah oo lala yeesho dad waaweyn oo si aan kala sooc lahayn loo soo xushay ee helaya adeegyada naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD). Sanadkani, iyada oo uu sabab u yahay cudurka baahsan, wareysiyada oo dhan waxaa lagu qaadayaa fiidiyow ahaan. Dad la tababaray oo wax wareysanaya oo ka socda Oregon Health and Science University (OHSU) ayaa la soo xiriiri doona dadka oo qorsheyn doonaa waqti telefoon ahaan, ama kambiyuutar ahaan lagula kulmo qofka weyn ee la aqoonsaday, iyo mas'uulka haddii ay habboon tahay. Dadku waxay dooran karaan qof iyaga ka caawiya dhanka wareysiga. Macluumaadka la wadaago oo dhani waa mid qarsoodi ah iyada oo ay natiijooyinkuna yihiin kuwo aan magac la socon. Oregon waa in ay qaadaa ugu yaraan 400 wareysi si loogu daro warbixinta qaranka. Warbixinta qaranka waxaa ku jiri doona macluumaad ka kala socda dhammaan gobolada ka qayb qaadanaya waxayna naga caawin doonaan in aan isbarbardhigno sida aan wax u wadno.

Warqadaha waxaa laga bilaabo bartamaha Janaayo 2021 loo diri doonaa dad waaweyn oo si aan kala sooc lahayn loo soo xushay si iyaga loola socodsiiyo fursad ay uga qayb qaadan karaan ra'yi ururinta. OHSU ayaa bilaabi doonta wicitaanka dadka si loogu qorsheeyo wareysiyada dhacaya dabayaaqada Janaayo. Wareysiyada oo dhan waa in lagu soo dhammeystiraa muddo aan ka dambeyn Juun 2021.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan NCI, fadlan booqo website-keeda <http://www.nationalcoreindicators.org/>. Wixii su'aalo ah ee ku saabsan nidaamka ra'yi ururinta ee ka jira Oregon, fadlan Julie Hoyt kala xiriiir Julie.Hoyt@dhsosha.state.or.us ama telefoon ahaan 503-891-7405.

Waxaan kuu soo horumarinaynaa mahad celin la xiriirta ka qayb qaadashadaada ra'yi ururintani muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Fariintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.